Warbixinta tallaalka koroonaha iyo tallaalista ee Bergen

Halkaan waxaad ka akhrisan kartaa warbixinta tallaalka koroonaha iyo sida aad tallaal ku heli karto.

In aad ballanla'aan ku timaaddo [Drop-in]
Dhammaan dadka ka weyn 12 sano ee ku nool degmada Bergen ayaga oo aan horey ballan u sii qabsan ayay imaan karaan Øvre Dreggsallmenningen 6 (eeg khariiradda) si loo tallaalo.

Ogow in carruurta u dhexaysa 12 ilaa 15 sano in looga baahan yahay foom oggolaasho oo qoraal ah islamarkaana lala yimaado xarunta tallaalka labada jeer ee ay qaadanayaan cirbadda tallaalka. Warbixin intaas ka badan ka eeg qaybta "Tallaalka carruurta iyo dhallinyarada da'da 12 ilaa 15 sano ". Sidoo kale eeg foomka oggolaashada ee bogga ugu danbeeya waraaqahaan.

Wakhtiyada la imaan karo ballanla'aanta:

- Isniin: 09.00 ilaa 15.30
- Talaado: 09.00 ilaa 15.30
- Arbaco: 09.00 ilaa 15.30
- Khamiis: 10.00 ilaa 16.30
- Jimce: 09.00 ilaa 15.30

Qabsashada ballanta
Degmada Bergen waxay wadashaqayn ku saabsan tallaalista koroonaha la leedahay dhakhaatiir joogto ah iyo farmashiyayaal. Bogga internetka ee xafiiska dhakhtarkaaga joogtada ah ka eeg in uu dadka u fidiyo tallaalka koroonaha iyo warbixinta sida ballanta looga qabsado. Farmashiyayaasha xaafadaha degmada oo dhan ayaa ayaguna sidoo kale tallaalka koroonaha u fidiya dadka ka weyn 16 sano. Maqaalka PDF-ka ah ka eeg warbixinta farmashiyayaasha bixiya tallaalka koroonaha. (Maqaalku wuxuu ku qoran yahay af-ingiriis, af-boolish, af-tigriinya, af-yukrayn, af-ruush, af-litaawen, af-roomaaniya iyo af-soomaali).

Si aad ballan uga qabsato xarunta tallaalka degmada ee Øvre Dreggsallmenningen 6 (khariidad), eeg warbixinta ku hoos qoran kooxdaada.

Warbixinta tallaalka
Degmada Bergen waxaa tallaalka lagu bixiyaa xarummaha tallaalka ee degmada iyo farmashiyayaasha, waxaana dadka la siiyaa tallaallada mRNA ee **Pfizer** iyo **Moderna**. Maaddaama labada tallaalba si wanaagsan loo heli karo, ayaad wakhtigan xaadirka ah kii aad doonto dooran kartaa marka aad tallaalista u timaaddo. Ogow dhammaan dadka ka yar 30 sano waxaa lagula taliyaa in ay Pfizer doortaan.

Waxaa kale oo Xafiiska ka hortagga cudurrada ee degmada Bergen dadka lagu tallaalaa tallaalka borotiinka ka samaysan ee **Nuvaxovid** (Novavax). Waa in aad 18 sano buuxisay si tallaalkan laguugu tallaalo. Bogga Machadka Caafimaadka Dadweynaha (FHI) ka akhriso warbixin intan ka badan oo ku saabsan tallaalka Nuvaxovid. (Warbixintu waxay ku qoran tahay af-ingiriis). Haddii aad doonayso in lagugu duro tallaalka Nuvaxoid, Xafiiska ka hortagga cudurrada kala xiriir telefoonka 55 56 58 80 ama iimaylka smittevernet@bergen.kommune.no. Waxaan codsanaynaa in aadan warbixin xasaasi ah iimaylka ku soo dirin.

Hadafka guud ee tallaalka koroonuhu waa in la badbaadiyo nafta iyo caafimaadka dadka halista ugu jira in uu fayraska koroonuhu ku dhoco. Haddii aad tallaalka qaadato, markaas waxay u badan tahay in aadan cudurka aad ugu xanuunsan.

Sida soo socota ayuu tallaalka koroonaha ku helayaa qofka ka weyn 16 sano

Si aad ballan u qabsato waxaad wici kartaa telefoonka koroonaha oo lambarkiisu yahay 55 56 77 00, ama waxaad iimayl u diri kartaa koronavaksine@bergen.kommune.no. Waxaan codsanaynaa in aadan warbixin xasaasi ah iimaylka ku soo dirin. Ballanta waad qabsan kartaa haddii aad u baahan tahay cidbadda 1-aad, midda 2-aad, midda 3-aad ama cirbadda xoojinta ah intaba. Si laguugu qabto ballan lagugu tallaalayo waxaa loo baahan yahay in ay cirbadaha u dhexayso muddadii loo baahnaa iyo in aad ku jirto dadka cirbaddaas loo fidiyo.

Warbixinta muddada loo baahan yahay in ay u dhexayso cirbadaha tallaalka ka eeg bogga internetka ee Machadka Caafimaadka Dadweynaha (FHI). (Maqaalku wuxuu ku qoran yahay af-ingiriis). Degmada Bergen qofka lagu tallaalayo xarummaha tallaalka ee degmada muddada ugu yar ee u dhexaysa cirbadda koowaad iyo midda labaad waa afar toddobaad, taas oo aan ku xirnayn haddii aad doorato Pfizer ama Spikevax.

Caadi ahaan xarunta tallaalka marka telefoon ama iimayl loo soo diro waxaa lagu jawaabaa luuqadaha af-norwiijiga iyo af-ingiriiska. Laakiin waxaa sidoo kale halkaas ka shaqeeya dad ku hadla luuqado kale, sida af-talyaani, af-carabi iyo faarsi. Haddii aad doonayso in aad telefoonka kula hadasho qof ku hadla luuqad aan af-norwiiji iyo af-ingiriis ahayn, wac telefoonka tallaalka ee ah 408 177 41, oo weydii in uu xarunta ka shaqeeyo qof ku caawin kara. Waxaa laga yaabaa in lagu yiraahdo telefoon soo dir wakhti go'an oo uu qofkaas asaga ah shaqada ku jiro.

Deeqda cirbadda labaad ee xoojinta (cirbad 4-aad) ee dadka ka weyn 65 sano

Dawladdu waxay ku talinaysaa in dadka ka weyn 65 sano in ay qaataan cirbad xoojin ah oo cusub (cirbad 4-aad).

Muddada ugu yar ee la doonayo in ay u dhexayso tallaalka xoojinta ah ee koowaad iyo midda labaad (cirbadda 3-aad iyo midda 4-aad) waa afar bilood.

Dadka dhashay 1957-kii ama ka hor waxaa lagula talinayaa in ay qaataan cirbad xoojin ah oo cusub, taas oo aan ku xirnayn in uu qofka dhowaan ku dhacay covid-19 iyo in kale. Muddada ugu yar ee la doonayo in ay u dhexayso markii aad ka biskootay cudurka koroonaha iyo qaadashada cirbadda xoojinta ah ee labaad ee tallaalka koroonaha waa saddex toddobaad. FHI waxay sheegaysaa in muddo intaas ka dheer oo u dhexasya markii uu covid-19 qofka ku dhacay iyo marka qofka lagu durayo cirbad tallaal oo cusub, in ay taasi sida caadiga ah sare u qaaddo difaaca jirka.

Bishii abriil ayay dawladdu oggolaatay in dadka ka weyn 80 sano in la siin karo cirbadda xoojinta ah ee labaad (cirbadda 4-aad). Haddii aad horey u qaadatay cirbaddaas, hadda mar kale lagu siin maayo cirbad xoojin ah oo cusub.

Haddii aad doonayso in lagu siiyo cirbadda xoojinta ah ee labaad, waxaad tegi kartaa adiga oo aan ballan qabsan xarunta tallaalka degmada ee ku taalla Øvre Dreggsallmenningen 6. Qaybta kore ee warqaddaan ka eeg wakhtiyada la tegi karo ayada aan ballan horey loo sii qabsan.

Markaad gaarto afarta bilood ee ugu yaraan loo baahan yahay in ay tallaalada u dhexayso ayaad si aad ballan u qabsato waxaad wici kartaa telefoonka koroonaha ee 55 56 77 00 ama waxaad iimayl u diri kartaa koronavaksine@bergen.kommune.no. Waxaa lagaa codsanayaa in aadan warbixin xasaasi ah iimaylka ku dirin.

Cirbadda xoojinta ah ee cusub (cirbadda 4-aad) farmashiyaha ayaad ku qaadan kartaa. Maqaalka PDF-ka ah ka eeg farmashiyayaasha dadka lagu tallaalo.

Dadka ku nool guryaha dadka waayeelka ah halkaas ayaa loogu fidin doonaa deeqda cirbadda tallaalka.

Ardayda iyo dadka kale ee aan ku jirin diiwaanka dadweynaha ee Bergen
Dhammaan dadka deggan degmada Bergen ama kuwa in muddo ah magaalada u jooga sababo waxbarasho, kuwo shaqo iyo wixii la mid ah waxaa halkan laga siin karaa tallaalka koroonaha, ayada oo aan loo eegayn cirbadda ay qaadanayaan. Xusuuso in lagaa rabo in ay cirbadaha tallaalka u dhexeyso muddadii loo baahnaa. Si aad ballan u qabsato wac telefoonka koroonaha ee ah 55 56 77 00 ama iimayl u dir koronavaksine@bergen.kommune.no. Waxaan codsanaynaa in aadan warbixin xasaasi ah iimaylka ku soo dirin. Farmashiyayaasha ayaad sidoo kale ka qaadan kartaa tallaalka koroonaha. Maqaalka PDF-ka ah ka eeg farmashiyayaasha dadka lagu tallaalo. (Maqaalku wuxuu ku qoran yahay af-ingiriis, af-boolish, af-yukrayn, af-ruush, af-tigriinya, af-roomaaniya, af-litaawen iyo af-soomaali).

Tallaalka dadka uu sida weyn difaaca jirkoodu u hooseeyo
Dadka waaweyn ee uu sida weyn u hooseeyo difaaca jirkoodu waxay u baahan yihiin saddex cirbadood oo tallaalka koroonaha ah si ay u helaan tallaal aasaasi ah. Waxaa kale oo la idiin fidinayaa cirbad xoojin ah. Cirbadda saddexaad ee tallaalku waa cirbad tallaal oo dheeri ah taas oo la siiyo dadka uu sida weyn difaaca jirkoodu u hooseeyo kuwaas oo la filayo in aysan difaac badan ka helin labadii cirbadood ee horey loogu tallaalay. Cirbaddaan saddexaad ayaa loo arkaa in ay ka mid tahay tallaalka aasaasiga ah, waxaana lagu taliyaa in dadka lagu duro marka ay cirbaddii labaad ka soo wareegto ugu yaraan 28 maalin. Waxaa kale oo kooxdaan loo fidiyaa cirbad xoojin ah (cirbad 4-aad). Muddada lagu taliyo in loo dhexaysiiyo cirbadda saddexaad ee tallaalka iyo cirbadda xoojinta waa ugu yaraan saddex bilood. Akhriso warbixin dheeri ah oo arag cudurrada keena in dadka uu sida weyn difaacooda jirku u hooseeyo in la siiyo cirbad 3-aad iyo cirbad xoojin ah (cirbad 4-aad). (Warbixintu waxay ku qoran tahay af-ingiriis)

Bukaanka haysta caddayn ku filan gaarayna muddadii loo baahnaa in ay tallaallada u dhexayso, si ay ballan u qabsadaan waxay wici karaan telefoonka koroonaha ee ah 55 56 77 00 ama iimayl u diri karaan koronavaksine@bergen.kommune.no. Waxaan codsanaynaa in aadan warbixin xasaasi ah iimaylka ku soo dirin

Tallaalka carruurta iyo dhallinyarada jirta 12 ilaa 15 sano

Mas'uuliyiinta dalku waxay go'aamiyeen in carruurta iyo dhallinyarada da'daan jira in fursad loo siiyo in laga tallaalo cudurka covid-19, laakiin ma soo bixin boorrin ama ku-talin midna kooxdan lagu farayo in ay tallaalka qaataan. Carruurta da'daan ah waxay qaadan karaan laba cirbadood oo tallaal ah haddii ay labada waalid ee ilmaha iyo ilmaha laftigiisu taas doonayaan. Tallaalistu waxay ka dhacaysaa xarunta tallaalka ee Øvre Dreggsallmenningen 6. Waalidka ilmaha mas'uulka ah waxay ballanta cirbadda koobaad iyo midda cirbadda labaad ba qabsan karaan ayaga oo wacaya telefoonka koroonaha ee 55 56 77 00. Waxaad sidoo kale iimayl u diri kartaan koronavaksine@bergen.kommune.no. Warbixinta muddada loo baahan yahay in ay u dhexayso cirbadaha tallaalka ka eeg bogga internetka ee Machadka Caafimaadka Dadweynaha (FHI). (Warbixintu waxay ku qoran tahay af-ingiriis).

Dadka ay da'doodu ka yar tahay 16 sano si loo tallaalo, waa in ay oggolaasho qoraal ah ka haystaan labada waalid ee ay mas'uuliyadda waalidnimo ka saaran tahay. Ka hor inta aan ilmaha lagu tallaalin cirbadda tallaalka, labada waalid ee ay saaran tahay mas'uuliyadda waalidnimo waa in ay buuxiyaan foomka oggolaashada. Buuxi foomka oggolaashada ee bogga waraaqahaan ugu danbeeya, soo daabac oo u soo qaado xarunta tallaalka. Waxaan u baahannahay in foom oggolaasho oo cusub la keeno xarunta tallaalka, haddii aad doonaysaan in ilmaha lagu tallaalo cirbadda labaad. Waxaa kale oo loo baahan yahay in labada waalid ee saxiixday foomka oggolaashaha midkood in uu ilmaha u soo raaco cirbadda 1-aad iyo midda 2-aad labadaba.

Maalinta tallaalka waxaa muhiim ah in la xusuusto

Ka hor intaadan u imaannin tallaalka fayraska koroonaha, waxaa muhiim ah in aad xusuusato waxyaalaha soo socda:

- Soo qaado aqoonsi shaqaynaya oo sawir iyo lambar dhalasho leh. Xusuuso in aad af-dabool xiran tahay.
- In lagu tallaalo ha u imaannin haddii aad isku aragto:
    - calaamado hargab, xummad ka sarraysa 38 digrii ama calaamado kale oo cudur infakshan ah.
    - Xanuun koroone oo markaas ku haya. (Eeg muddada lagu taliyo in loo baahan yahay in aad guriga joogto).
    - Mararka ay sidaan oo kale dhacdo waxaad wici kartaa telefoonka koroonaha ee 55 56 77 00 ama waxaad iimayl u diri kartaa koronavaksine@bergen.kommune.no si aad ballan cusub u qabsato. Waxaan codsanaynaa in aadan warbixin xasaasi ah iimaylka ku soo dirin.
    - Soo xiro dhar suuragelinaya in aan si fudud kaaga duri karno gacanta garabka hoostiisa.
    - Ku tala gal in aad 20 daqiiqo meesha sii joogi doonto marka lagu tallaalo kaddib si laguula socdo.
    - Ayadoo la tixgelinayo dadka kale ee tallaalka qaadanaya iyo shaqaalaha goobta, waxaan codsanaynaa in aan xarunta tallaalka sawir iyo filin midna lagu qaadin.

Gaadiidka dadweynaha iyo baarkinka

Øvre Dreggsallmenningen 6 (khariidad): Xarunta tallaalku waxay ku taallaa geeska Bryggen jihada Sandviken, waxayna u dhowdahay kaniisadda Mariakirken iyo Vikinghallen. Waxaad soo raaci kartaa gaadiidka dadweynaha ee u socda bartammaha Bergen. Boosteejada baska ee ugu dhow waa Bryggen (baabuurta ka imaanaysa koonfur iyo galbeed) iyo midda Bradbenken (baabuurta ka

imaanaysa waqooyi). Haddii aad gaari wadato, meelo baabuurta la dhigto ayaa ku yaalla waddooyinka u dhow xarunta tallaalka. Haddii kale waxaad gaariga dhigan kartaa guryaha baarkinnada ah ee aaggaas ku yaalla.

Tallaalka carruurta jirta 5 ilaa 11 sano

Carruurta jirta 5 ilaa 11 sano ee ku nool degmada Bergen waxaa loo fidinayaa tallaal gaar ah oo carruurta loogu tala galay oo ay soo saartay Pfizer. Warbixin intaan ka badan ka akhriso maqaalka PDF-ka ah. (F.G: Maqaalku wuxuu ku qoran yahay af-ingiriis oo keliya).

Shahaadada koroonaha ee dadka aan haysan lambar aqoonsi oo Norway laga bixiyay

Dawladdu waxay diyaarisay nidaam shahaadada koroonaha ee tallaalka lagu siinayo dadka aan haysan lambar dhalasho- iyo mid d-lambar oo Norway laga bixiyay. Bogga internetka HelseNorge ka akhriso warbixinta nidaamkaas. (Warbixintu waxay ku qoran tahay af-ingiriis)

Shahaadada koroonaha ee warqadda ah waxay shaqaynaysaa saddex bilood. Haddii aad u baahato in warqadda mar kale laguu daabaco, waxaad la xiriiri kartaa Xafiiska ka-hortagga cudurrada ee degmada Bergen oo aad ka helayso telefoonka 55 56 58 80 ama iimayl: smittevernet@bergen.kommune.no. Markii lagu siiyay shahaadada koroonaha ee warqadda ah kaddib haddii aad qaadatay cirbad tallaal ah oo cusub, si loo cusboonaysiiyo shahaadada koroonaha waa in aad warqad cusub u dirtaa Helfo, adiga oo u diraya sida ku sharraxan maqaalka bogga internetka ee HelseNorge.

Haddii aadan isticmaali karin adeegyada dhigitaalka ah

Dadweynaha leh lambarka dhalashada- ama midka d-lambar ee Norway laga bixiyay ee aan isticmaali karin nidaamka dhigitaalka ah, sida soo socota ayay caawin bilaash ah uga heli karaan Xafiiska ka-hortagga cudurrada:

- Gadaal ka diiwaangelinta tallaalka koroonaha ee dibedda lagu soo qaatay. Tallaalka gadaal waa laga diiwaangelin karaa meel kasta oo lagu soo qaatayba, laakiin waa in tallaalku ahaadaa mid ay aqoonsan tahay hay'adda daawada ee Yurub EMA.
- Shahaadaha koroonaha oo daabacan taas oo tusaysa in tallaal la qaatay ama in uu qofka ku dhacay covid-19
- Sixidda wixii khalad ah ee ku qoran ama macluumaad ka maqan shahaadada koroonaha ee tallaalka lagu qaatay xarummaha tallaalka ee degmada Bergen.

Si laguu caawiyo, Xafiiska ka-hortagga cudurrada kala xiriir telefoonka 55 56 58 80 ama iimayl: smittevernet@bergen.kommune.no. Waxaa lagu xusuusinayaa in ay warbixinnada caafimaadku yihiin macluumaad xasaasi ah. Macluumaadkaas **ma aha** in iimayl lagu diro.

Xafiiska ka-hortagga cudurradu nasiibdarro *kaama* caawin karo:

- Gadaal ka diiwaangelinta covid-19 kugu dhacay adiga oo dibedda jooga ama tijaabo aad adigu iska qaadday oo cudurka lagaa helay.
- Tallaallo lagu qaatay meelo kale oo Norway ah oo aan ahayn xarummaha tallaalka ee degmada Bergen. Haddii ay taasi jirto waxaad la xiriiri kartaa dhakhtarka joogtada ah, farmashiyaha ama degmada.

BERGEN
KOMMUNE

Oggolaashaha tallaalka

Anigu/innagu waxaan doonayaa/doonaynaa in ilmahayga/ilmahannaga laga tallaalo cudurka covid-19.
Magaca ilmaha: _____ Lambarka dhalashada ee ilamaha: _____

Magaca iskoolka: _____ Xaafadda: _____

Waalidka leh mas'uuliyadda waalidnimo:
Labada waalid/mas'uulka ka ah ee ay saaran tahay mas'uuliyadda waalidnimo waa in ay saxiixaan oggolaashada. Waa in aad foom oggolaasho oo cusub keentaan mar kasta oo cirbad tallaal oo kale la qaadanayo. FG! Haddii uu hal waalid keligiis leeyahay mas'uuliyadda waalidnimo waxaa ku filan in uu waalidkaasi saxiixo, laakiin waa in uu xarunta tallaalka u soo qaataa caddaynta in uu mas'uuliyadda waalidnimada keligii leeyahay.

Waalidka/mas'uulka 1-aad:
Magaca oo buuxa (qor far si fiican loo akhrin karo):_____
Taariikh iyo goob: _____
Lambar telefoon: _____

Oggolaashada cirbadda tallaalka ee ilmaha hadda la siinayo: (Haa ku qor haddii aad oggolaanayso)

Cirbadda 1-aad:_____Cirbadda 2-aad:_____Cirbadda 3-aad: (Waxaa loogu tala galay carruurta uu sida weyn u hooseeyo difaaca jirkoodu oo keliya*):_____

Saxiix: _____

Waalidka/mas'uulka 2-aad:
Magaca oo buuxa (qor far si fiican loo akhrin i karo):_____
Taariikh iyo goob: _____
Lambar telefoon: _____

Oggolaashada cirbadda tallaalka ee ilmaha hadda la siinayo: (Haa ku qor haddii aad oggolaanayso)

Cirbadda 1-aad:_____Cirbadda 2-aad:_____Cirbadda 3-aad: (Waxaa loogu tala galay carruurta uu sida weyn u hooseeyo difaaca jirkoodu oo keliya*):_____

Saxiix: _____

*Xusuuso in aad soo qaadato caddaynta in uu ilmahaagu ka mid yahay kooxda uu sida weyn u hooseeyo difaaca jirkoodu ee loo fidiyo cirbadda saddexaad ee tallaalka koroonaha. Warbixin intaan ka badan ka eeg www.bergen.kommune.no/koronavirus/vaksinering